

DALABAADKA OONLEENKA EE WIC AYAA HADDA LAGA HELI KARAA WALMART!

QAAB FUDUD OONLEENKA UGU IIBSO CUNTOOYINKA WIC

- Dooro wakhtiga lagu keenaayo ama aad qaadanayso ee kugu habboon.
- Ku soo koob raadintaada cuntooyinka WIC ee aad u qalanto.

OGOOW KAHOR INTA AADAN GELIN OONLEENKA

- Dooro dukaanka Walmart oo ku yaala meel uun kamid ah Washington.
- Hubi baaqiga gunnadaada kuugu jira ablikeeshinka WICShopper ama webseedka Walmart.
- Xili hore wax iibso! Qaadista, gaynta, iyo isdhaafsigu waa in lagu sameeyaa **gudaha mudadaada hadda ee gunnada.**
- Hubi si aad u aragto haddii gayntu tahay dookh laga heli karo aagaaga.
 - » Fadlan ogoow: WIC ma daboolayso kharashka gaynta adeega.

Oonleen wax ku iibso Adoo
Adeegsanaaya Webseedka ama
Ablikeeshinka Walmart.

Walmart | Badbaado Lacag. Nolol Fiican hel.


Soo degso Ablikeeshinka Walmart.



Su'aalaha iyo Taageero ah la xiriir
Xarunta Caawimaada ee Walmart

Caawimaad - Walmart.com

Taleefoonka: 1-800-925-6278





SIDA LOO BILAABO

- Booqo Walmart.com ama fur ablikeeshinka Walmart.
- Guji **“Sign in (Gal)”** ama **“Create an account (Furo Ciwaan).”**
- Guji **“Add new payment method (Kudar Nooc Cusub oo Lacag bixin ah)”** ama **“Add payment card (Kudar Kaarka Lacag bixinta)”** kadibna geli lambarka kaarkaaga WIC iyo BIINKA.

SIDA WAX LOOGU IIBSADO

Waxaa jira 2 qaab oo lagu raadiyo cuntooyinka WIC.

1. Adeegso Qaybta Raadinta.

- Geli cuntada aad raadinaysa.
- Raadi summada “WIC Eligible (U Qalma WIC)”.
- Guji “+Add (Kudar)”
- Fadlan ogoow: Walmart ayaa kuu soo bixin karta alaabo badan oo aan u qalmin WIC. Hubi summada “WIC Eligible (U Qalma WIC)” iyo liiskaaga dukaamaysiga si aad u xaqiijiso noocyada gunnooyinka cuntada ee aad ka helayso koontadaada.

2. Wax ku iibso gunnooyinka WIC

- Ka dooro **Services (Adeegyada)** dookhyada soo baxaaya.
- Dooro **Online Ordering (Dalabaadka Oonleena ah)**.
- Ka dooro **WIC Qaybta Benefits Programs (Barnaamijyada Gunnada)**.
- **KU DAR** cuntooyinkaaga u qalma WIC.

SIDA LACAGTA ADEEGGA LOO BIXIYO

1. Guji **Shopping Cart (Salladada Dukaamaysiga)**.
2. Dooro **Pickup (Qaadasho)** ama **Delivery (Gayn)** kadibna dooro maalinta iyo wakhtiga.
 - » Gaynta la heli karo waxaa lagu saleeyaa ciwaanka.
3. Guji **“Continue to check out (Sii wad inaad alaabta la Baxdo).”**
4. Geli **BIINKAAGA WIC**.
5. Eeg dalabkaaga iyo dookhaaga lacag bixinta.
6. Guji **“Place order (Dir dalabka).”**
 - » Geli BIINKA WIC markale si aad u amarto adeegsiga kaarkaaga WIC.

Liiskaaga gunnada ayaa isbadelaaya marka aad dirto dalabka.

TILMAAMAHA:

Waxaad haysataa 4 iskuday si aad u geliso BIINKAAGA kahor inta aan koontadaadu xirmin ilaa saqda dhexe.

Walmart ayaa kaa dooneysa inaad geliso noocaaga kale ee lacag bixinta haddii aad doorato in lagu keeno alaabta ama aad haysato agabka kale ee aan ahayn WIC oo la socda dalabkaaga.